

# Nidaamka Goobta Rasaasta ee Acoustic

## Seattle Police Department


### Waa maxay Tiknoolajiyadu?

Seattle Police Department (SPD, Waaxda

Booliska ee Seattle) ayaa soo jeedinaya Acoustic Gunshot Location System (AGLS, Nidaamka Goobta Rasaasta ee Acoustic) si loo boobsiiyo awoodaha gurmadii kaa ee booliska iyo shaqaalaha EMS si ay u caawiyaan dhibaneyaaasha, u helaan una uruuriyaan cadeynta ayna u soo qabtaan dadka masuulka ka ah rabshada hubaysan. AGLS waxay adeegsataa mikrafoonoo/aaladaha dareemaha oo la gasho aagag gaar ah oo loo diyaariiyay inay sheegaan codka rasaasta ayna ogaadaan goobta kuna wargeliso booliska dhacdada.

### Maxaan u adeegsanaynaa tiknoolojiyada?

AGLS ayaa ka caawinaaya baareyaasha aruurinta caddeynta la xiriirta dhacdooyinka xabadaha waxayna siinaysaa xogta goobta rasmiga ah shaqaalaha gurmadii. Xogtaan ayaa ku hagaysa saraakiisha iyo EMT yada goobta rasmiga ah, waxayna kor qaadaysaa cadeynta ka caawinaysa cadaalad ay helaan dhibaneyaaashu, meesha ka saaraaya hubka sharci darada ah ee bulshada.



Waqtiga ay furanyihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Wuxuu faallooyin ku bixin kartaa [Seattle.gov/Surveillance](http://Seattle.gov/Surveillance).

Faallooyinka dhammaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee farsamadaan waxaana loo gudbinayaa Dawlada Hoose.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Dawlada Hoose adoo adeegsanaaya iimeelka oo ah <https://seattle.gov/council>.

#### Uruurinta

Nidaamka sheega goobta rasaasta ee Acoustic ayaa qabta codka ka sareeya 120 decibels – oo ka sareeya dhawaqa hadalka dadka. Codkaan ayaa la qabtaa muddo kooban kahor iyo kadib dhacdada, iyo sidoo kale inta lagu jiro dhacdada. Nidaamka ayaa xisaabiya goobta rasaastu ka dhacday. [Policy 7.010 \(Xeerka SPD 7.010\)](#) ayaa maamula gudbinta cadeynta una baahan in dhammaan cadeynta lasoo uruuriyay lagu diiwanha gasho General Offense Report (Warbixinta Guud ee Danbiyada).

#### Isticmaalka

Nidaamka sheega goobta rasaasta ee Acoustic ayaa yareeyaa hoos u dhacyada ciidanka ilaalada iyo baaritaannada ayadoo la adeegsanaayo tignoolojoiyada leh caddeynta kuna habboon marxaladaha taagan si loo yareeyo loona baaro habdhqaanka danbiyada joogtada ah, rabshada hubaysan, tahriibinta dadka, ee meesha danbigu ku badan yahay.

Aagaga ay suurtgalka tahay in lagu sameeyo tijaada ayaa ku yaala Aurora Avenue North, Belltown, Chinatown-International District, iyo Downtown Commercial Core.

#### Difaacyada

Keliya shaqaalaha loo ogol yahay ee SPD, Office of Inspector General (OIG, Xafiiska Kormeeraha Guud) iyo Office of Police Accountability (OPA, Xafiiska Isla-xisaabtanka Booliska) ayaa geli kara xogta AGLS inta ay ku jirto aaladaha. Gelitaanka nidaamka/tignoolojoiyada ayaa ku kooban shaqaalaha loo ogol yahay ayagoo adeegsanaaya xogta gelitaanka baasawerka ku shaqeysa.

Xogta waxaa keliya loo eegi karaa ama loola bixi karaa ujeedooyinka sharci fulinta keliya, sida ku cad Policy 12.050 (Xeerka SPD 12.050) waxaana lagu kaydin doonaa goob ku saleysan nidaamka kaydka casriga ah. Muddada la haynaayo waxaa go'aamiya in xogtu leedahay muhiimad cadeyn iyo inkale. Xogta aan lahayn muhiimad cadeyn ayaa la tirtiraa 30 maalmood kadib.



City of Seattle